

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Si qalbi culus, waxaan maanta idin soo gudbinayaa inagoo u barooraneyno geerida naxdinta leh ee ku timid arday da'yar ee Dugsiga Sare ee Lithonia. Rabshadaha micnaha la'aanta ah ee sii wada dhibka bulshadeena waa xaalad degdeg ah oo u baahan dareenkeena iyo talaabadeena degdega ah. Ma awoodi karno inaan mar dambe indhaha ka daboolano; waqtiga isbadelka waa hadda.

Codka bulshadeena wuxuu leeyahay awood weyn oo lagu badelo nidaamka, oo waa inaan aqoonsanaa midaan oo aan u isticmaalnaa si waxtar leh. Waxaan u baahannahay inaan isu imaano, ku midowno Gobolka DeKalb oo dhan, oo aan ku dhawaaqnaa hal cod oo dhawaq leh kaasoo ah nagu filan waa nagu filan. Waa inaan dib uga soo ceshanaa bulshadeena qabsashada rabshadaha oo aan meel badqab ah uga dhignaa carruurteena.

Aan dhinac ka wada marno leemanka isdiidan ee siyaasadaha oo aan diirada saarno waxa runtii noo muhiim ah: badqabka iyo faydada qabka carruurteena. Waa inaan ka fogaana shaqsiyaadka hadal ku oolka ah ee raadiyo inay hormarka ka leexiyaan, labadaba gudaha iyo dibada. Waa inaan ka mudnaanta siinaa wanaaga guud ajandayaasha shaqsiyaadka, inagoo si wadajir ah uga shaqeyneyno yoolka guud.

Si midaas loo gaaro, waxaa lama huraan ah inaan shaqaale ku fillan ay leeyihiin dugsiyadeena iyo xafiiska dhexe, inagoo hubineyno inaan haysano illaha iyo taageerada muhiimka u ah in lagu daboolo baahiyaha canug walba ee maalin walba. Waa inuusan canugna wajahin halista rabshada isagoo ku dabajiro waxbarasho. Waa inaan ka sare marnaa oo dhaafnaa, inagoo sameyneyno wax walbooy qaadata si aan u illaalino oo aan u kobcino ardaydeena.

Si kastaba, waa inaan sidoo kale ka qeybgalnaa is milicsiga. Waxaan u baahannahay inaan eegno muraayada oo aan weydiinaa nafsadeena inaan sameyno ama aanan sameynin inaan gacan ka geysano dhaqanka daneyn la'aanta ee waariyo dilalkaan macna darada ah. Ma sii wadi karno inaan iska ilowno arimahaan sida dhibaataada qof kale.

Mas'uuliyadaheena wadajirka ah waa u abuurista jawi badqab ah carruurteena, oo waxay ku bilaabataa mid walboo naga mid ah. Aan usu imaano, aan milicsano falalkeena la soo dhaafay, aan u midowno ujeeda guud, oo aan u korno sida bulsho. Kaliya dadaaladeena wada jirka ah ayaa soo afjari karo wareega rabshadahaan. Carruurteena waxay u qalantaa si wanaagsan, oo way nagu leeyihiin inaan u abuurno mustaqbal ifayo.

Gabagabada, waxaan idinkaga tagayaa xigasho oo soo koobeyso muhiimada hadafkeena: "*Milicsashada, midoobida, iyo korista, dhammaan waa wanaag guud.*" Waa inaan si mideysan u joogsano, garab ku garab, oo aan uga shaqeynaa dhinacyada mustaqbal meeshaas oo carruurteena ay ku kobci karto iyadoon cabsi jirin.

Wadajirkeena waxaan sameyn karnaa isbadel,

Dhaqtar Devon Q. Horton, *Kormeeraha guud*

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb